IIB MA GALO

FAAFINTA RASMIGA AH

الجريدة الرسمية

JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

لجمهورية الصومال الديمقراطية

Sannadka 8aad Muqdisho 28 Agoosto 1980 L. 1 R 8

FAAFINTA BIL SOO BAXA جريدة شهرية

Laanta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada J.D.S.

QIIMAHA : waa 5 shilin lnmbar walba **RUKUNKA** : Sanalkii waa Sh. 100 Soomaaliya gudaheeda — dibedana waa Sh. So, 300, Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilaabmaa 1 Janaayo Qiimaha qorotaanka F. R, halkii sadar iyo wàxii ka yàı wàà 2 laba Sh. — Rukunka iyo qorjtaanku waxaa la weeydiistaa Laanta Maamulkà Fààfintà Rasmiga ah — Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuurahà ee Wàsààràddà Làcagta.

KOOBNIIN

Q A Y B T A **K O O W A A D**

SHARCI

SHARCI L. 23 ee 6 Agoosto 1980, Gunno fadhi iyo gunno gaar ahaaneed ee Golaha Shacbiga.

SHARCI L. 24 ee 10 Agoosto 1980, Baabi'inta Guddiga Cadaaladda.

Q A Y B T A **L A B A A D**

X E E R

XEER WASAARADDA BOOSTADA IYO ISGAARSIINTA 91 ee 2 Agoosto 1980, Sameyn tariifa cusub ee Telefoonka MUQDISHO — ROMA

XEER WASAARADDA BOOSTADA IYO ISGAARSIINTA L. 92 ee 2 Agoosto 1980, Kordhinta Qiimaha Kirada Telekiska

Wakaaladda Madbacadda Qaranka

WASAARADDA H. GUUD 18. 8. 1980, Naado Dhul
Jaalle Maxamuud Diiriye Maxamed L. 418

WASAARADDA H. GUUD 18. 8. 1980, Naado Dhul
Jaalle Cumar Maxamed Cali L. 419

WASAARADDA H. GUUD 18. 8. 1980, Naado Dhul
Cali Ismaaciil Maxamuud L. 420

WASAARADDA H. GUUD 18. 8. 1980, Naado Dhul
Cumar Maxamed Cusmaan L. 421

WASAARADDA H. GUUD 18. 8. 1980, Naado Dhul
Cali Ismaaciil Maxamuud L. 422

WASAARADDA H. GUUD 18. 8. 1980, Naado Dhul
Jaalle Cumar Maxamuud Cusmaan L. 423

WASAARADDA H. GUUD 18. 8. 1980, Naado Dhul
Jaalle Maxamuud Xasan Maxamuud L. 424

WASAARADDA H. GUUD 18. 8. 1980, Naado Dhul
Jaalle Cali Ismaaciil Maxamuud L. 425

WASAARADDA H. GUUD 18. 8. 1980, Naado Dhul
Jaalle Maxamed Xuseen Axmed L. 436

WASAARADDA H. GUUD 18. 8. 1980, Naado Dhul
Jaalle Maxamuud Xaaji Jumcaale L. 427

WASAARADDA H. GUUD 18. 8. 1980, Naado Dhul
Jaalle Muuse Maxamed Yuusuf L. 428

WASAARADDA H. GUUD 18. 8. 1980, Naado Dhul
Xaashi Cabdi Barre L. 429

WASAARADDA H. GUUD 18. 8. 1980, Naado Dhul
Jaalle Cabdi Iidle Shuuriye L. 430

WASAARADDA H. GUUD 18. 8. 1980, Naado Dhul
Jaalle Maxamed Xareed Maxamed L. 431

WASAARADDA H. GUUD 18. 8. 1980, Naado Dhul Jaalle Cabdulaahi Cali Dhuubo; L. 432

WASAARADDA H. GUUD 18. 8. 1980, Naado Dhul Sahro Cabdi Maxamed iyo Axmed Abi L. 433

WASAARADDA H. GUUD 18. 8. 1980, Naado Dhul Jaalle Xaaji Yuusuf Sheekh Cabdi L. 434

MAXKAMADDA GOBOLKA SH/HOOSaa 25. 8. 80, Lumid laba Buug Kayd L. kala yihiin 243 iyo 93 L. 435

MAXKAMADA GOBOLKA BANAADIR, 27. 8. 1980, Lumid Buug Kayd L. 243 L. 436

MAXKAMADA GOBOLKA BANAADIR 26. 8. 80, Lumid Buug Kayd L. 15029 L. 437

WASAARADDA H. GUUD, 20.4.1980 Naaddo Dhul Jaalle Cali Xasan L. 446

WASAARADDA H. GUUD, Muqdisho Marka 20.4.80 Naado Dhul Jaalle Mayow Sheekh Cusmaan L.447

QAYBTA KOOWAAD

SHARCI L. 23 ee 6 Agoosto 1980 Gunno fadhi iyo gunno gaar ahaaneed ee Golaha Shacbiga

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO ARKAY : Dastuurka Jamhuuriyada Dimoqraadiga Soomaaliya qodobadiisa 64, 66 iyo 73aad;

IYADOO SALDHIG looga dhigaayo oggolaanshaha Guddiga Joogtada ah ee Golaha Shacbiga

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharci*ga soo* socd*a* :

*QODO***BKA** *1AAD*

Xildhibaannada Golaha Shacbiga ee shir isugu yimaada fadhigiisa caadiga ah (labada kalfadhi) iyo kuwo aan caadi ahayn, waxay yeelanayaan gunno ramzi ah oo dhan Sh So. 1 (hal shilin) fadhigiiba oo xildhibaanka ka qayb qaato.

QODOBKA 2AAD

Xildhibaannada ka mid ah xubnaha Guddiyada Golaha Shacbiga ee ku tilmaaman Xeer Hoosaadka Golaha Shacbiga oo Shir isugu yimaada waxay Yeelanayaan gunno oo dhan Sh. So. 30 fadhigiiba.

QODOBKA 3AAD

Howlwadeennada iyo shaqaalaha kale ee Golaha Shacbiga mushaaharadooda iyo gunnooyinka caadiga ah ka sokow, waxay yeelanayaan bil kasta gunno gaar ahaaneed oo u kala baxda sida socota :

— Agaasimaha Guud	Shs. 1.000
— Agaasimayaasha Waaxyaha	Shs. 800
— Madax Qayb	Shs. 500

—	Madax Xubin	Shs. 450
—	Aqoonyahanno «A»	Shs. 500
—	Sarkaal Fuliye «B»	Shs. 350
—	Karaani iyo shaqaale kale «C»	Shs. 300
—	Adeege	Shs. 200
—	Xisaabiye Sare	Shs. 500
—	Xisaabiye	Shs. 300
—	Kaaliye Xisaabiye	Shs. 200
—	Khasnaji	Shs. 150

QODOBKA 4AAD

Sharcigan wuxuu dhaqan galayaa 24 Jennaayo 1980, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.
Muqdisho, 6 Agoosto 1980

MADAXWEYNAHA J. D. S.
S/GAAS MAXAMED SIYAAD BARRE

Sharci Lambar 24 taariikh 10 Agoosto 1980 Baabinta Guddiga Cadaaladda

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO TIXGELINAAYA Oggolaashaha Guddiga Joogtada ah ee Golaha Shacbiga,

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda :

QODOBKA 1AAD

Waxaa la baabi'yey Guddiga Cadaaladda Madaxtooyada Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya oo lagu dhisay Sharga tirsigiisu yahay 5 soona baxay 16kii Agoosto 1976.

QODOBKA 2AAD

Xilka Guddiga Cadaaladda waxa uu ku eg yahay 1da Luulyo 80.

QODOBKA 3AAD

Xukunnada iyo go'aannada Maxkamadeed ee Guddiga hor yaal, welina aan go'aan laga gaarin, waxaa loo aqoonsanayaa in ay yihiin kama dambeys.

QODOBKA 4AAD

Xukunnada iyo go'aannada Guddiga Cadaaladdu jebiyey, laguna celiyey Maxkamadaha, waxaa lagu dhaqayaa, iyadoo la tixgelinaayo Maxkamadda dib loogu celiyey, Xeerka Habka Ciqaabta iyo Xeerka Habka Madaniga.

QODOBKA 5AAD

Cabashooyinka laga soo qaatay xukunnadda Maxkamadda Badbaadada Dalka iyo Laamaheeda, go'aannada Guddiyada Nabadgelyada iyo Guddiga Lacagta degdegga ah ee laalan, waxaa lagu wareejinayaa Xafiiska Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya.

QODOBKA 6AAD

1) Ku meel gaar ahaan, xukunnada ciqaabeed, madani iyo shaqo ee Maxkamadda Badbaadada Dalka iyo Laamaheeda, waxaa cabasho looga qaadan karaa Madaxweynaha saddex bilood gudahood, laga bilaabo maalinta ku dhawaaqidda xukunka.

2) Madaxweynuhu wuxuu awood u leeyahay inuu xukunsanaha ka cafiyo ciqaabta, gebi ahaan ama qeyb ka mid ah, ama u beddelo ciqaabta xarigga ah mid lacageed. Wuxuu kaloo awood u leeyahay inuu jebiyo xukunnada ku cad lambarka 1aad ee Qodobkan, isagoo ku celinaaya Maxkamadda xukunka ridday ama laan ka duwan tii hore, amrayana in lagu laabto dhegeysiga dacwadda.

QODOBKA 7AAD

1) Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa 1da Luuliyo 1980. waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

2) Qof kasta oo shaqo ku leh waxaa la farayaa inuu dhawro, kana hawl galo in loo dhawro Sharci ahaan.

Muqdisho. 10 Agoosto 1980

MADAXWEYNAHA **J. D. S.**
S/GAAS MAXAMED SIYAAD BARRE

QAYBTA LABAAD

XEER WASAARADDA BOOSTADA IYO ISGAARSIINAA L. 91 ee 2 Agoosto 1980 sameyn tariifa cusub ee Telefoonka Muqdisho—ROMA.

WASIISKA

ASAGOO ARKAY : Dastuurka J. D. S

ASAGOO ARKAY, Qod 9aad ee Sharciga Isgaarsiinta Lamb 1 soona baxay 22kii Diseember 1975;

ASAGOO ARKAY : Baahida loo qabo in laga faa'iideysto Shaqada Dayaxgacmeedka oo furan 24ka Saac Maalin Walba;

ASAGOO KALA TASHADAY: Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda

WUXUU XEEREEYEY

QODOBKA 1AAD

Qiimaha Wacidda Teleefoonka Muqdisho — Rooma qof alla qofkii doonaa inuu la hadlo Rooma inuu bixiyaa qiimaha hoos ku qoran :

Khidmadda	3dii Daqiiqo	Daqiiqad walba Dheeraad ah
Sh. So. 13,60	Sh. So.40,80	Sh. So.13,60

QODOBKA 2AAD

Laga billaabo habeen barkii 00.00 ilaa 06.00 aroornimo waxa laga dhigay qiimaha Qodobka 1aad 25% waana sidatan

Khidmada	3dii Daqiiqo	Daqiiqad walba oo dheeri ah
Sh. So. 13,60	Sh. So. 30,60	Sh. So. 10.20

QODOBKA 3AAD

Xeerkan wuxuu dhaqan geleyaa 1da Agoosto 1980 waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah.

Muqdisho, 2 Agoosto 1980

WASIIRKA BOOSTADA IYO ISGAARSIINTA
(INJ. MAXAUED XAWAADLE MADAR)

WASIIRKA WASAARADDA MAALIYADDA
(Dr. Cabdullaahi Axmed Caddow)

Waan aragnay ee Diiwaan gelinay.
Diiwaan lam. 1 Buug lam. 9
Muqdisho 6 Agoosto 1980
Hantidhawrka Guud
Ku Xig. Yuusuf Cali Nuur

XEER WASAARADDA BOOSTADA IYO ISGAARSIINTA
L. 92 ee 2 Agoosto 1980 Kordhinta qiimaha Kirada Telekiska

WASIIRKA

ASAGOO ARKAY : Dastuurka J.D.S.

ASAGOO ARKAY: Qad 9aad ee Sharciga Isgaarsiinta Sharci Lamb. 1 soona baxay 22kii Diseember 1975tii.

ASAGOO ARKAY: Qad 4aad ee Sharciga Telekiska Sharci Lamb 66 soona baxay 25kii Seteember 1971dii.
Asagoo kala tashaday Wasiirka Maaliyadda.

WUXUU XEERIYAY

QODOBKA 1AAD

Kiradii Makiinadaha Telekiska oo horey u ahaan jirtay Sh. So 500/ Bishii waxaa laga dhigay Sh. So. 750 Bishii ama Sh. So. 9000 Sannadkii.

QODOBKA 2AAD

Qofkii hore u baxshay qiimihii hore oo ahaa Sh. So. 500 waq tigii ka horeeyay 30kii Juun 1980. Wax dheeraad ah laga qaadi maayo ilaa 31. 12. 1980ka gaaridoono wixii taariikhdaas ka dambeeya waxaa laga qaadidoona kirada cusub.

WASIIRKA WASAARADDA MAALIYADDA
(Dr. Cabdullaahi Axmed Caddow)

WASIIRKA WASAARADDA BOOSTADA iyo ISGAARSIINTA
INJ. MAXAMED XAWAADLE MADAR

Waan aragnay ee Diiwaan gelinay .
Diiwaanka lam. 1 bog. lam. 10
Muqdisho 6 Agoosto 1980
Hantidhowrka Guud.

Hantidhowrka Guud.
Ku Xig. Yuusuf Cali Nuur

WASAARADDA *HAWLAHA GUUD*
WAADA DHISMAHA & *DHULKA*
N A *A D O* D *H U L*

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Maxamuud Diiriye Maxamed uu ku soo weydiistay Arji Taariikhdii 8. 2. 1979 gabal dhul ah oo ku yaal Degmdda Shalambood Qaabkiisu yahay Addimihiisu yihiin 20X 20X 20 X 20 kuna fadhiya 400 MDH.

Waqooyi waxaa ka xiga Dhul Banaan

Koonfur waxaa ka xiga : Waddada Golweyn iyo Xamar

Galbeed waxaa ka xiga : Waddo

Bari waxaa ka xiga : Dhul Banaan oo u dhaxeeyo asaga

Qoofkii Daneynaya Dhulkaas waxuu si fiicar uga arki karaa Naqshadda Dhulka oo taal Waaxda Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud Gobolka Shabeeladda Hoose waxaanna laga doodi karaa Muddo ku siman 30 (Sodon) Maalmood oo laga Bilaabayo Maalinta la soo daabaco Buugga Faafinta Rasmiga ah :

Laguna soo dhejiyo Ogeysiisyada ee Dawladda Hoose Waax-Farsamadda Dhulka.

Shalamboot, 18. 8. 1980

AGAASIMAHA *WAAXDA SAH. IYO DEG. MAGAALEYNTA*
CABDI *MAXAMED* CUMAR

L. 418

WASAARADDA *HAWLAHA GUUD*
WAADA DHISMAHA & DHULKA
N A *A D O D H U L*

Waxa la caddeynayaa in Jaalle Cumar Maxamed Cali u soo qortay Waaxda Sahnka iyo Degaanka Magaaleynta ee W. H. Guud maalintii bishu ahayd 23. 4. 1980 uu ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Degmada Marka Qaabkiisu waa Retangolo addimihiisuna waa 19,00. 19,00. 8,50,50 kuna fadhiya 161,50/ MDH.

Waqooyi waxaa ka xiga : Guri Dhisan

Koonfur waxaa ka xiga : Waddo lamaro

Galbeed waxaa ka xiga ; JID

B A R I wxaa ka xiga : JID

Qoofkii Daneynaya Dhulkaas waxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda Dhulka oo taal Waaxda Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud Gobolka Shabeeladda Hoose waxaanna laga doodi karaa Muddo ku siman 30 (Sodon) Maalmood oo laga Bilaabayo Maalinta la soo daabaco Buugga Faafinta Rasmiga ah :

Laguna soo dhejiyo Ogeysiisyada ee Dawladda Hoose Waax-Farsamadda Dhulka.

Shalamboot, 18. 8. 1980

AGAASIMAHA *WAAXDA SAH. IYO DEG. MAGAALEYNTA*
CABDI MAXAMED CUMAR

L. 419

WASAARADDA *HAWLAHA GUUD*
WAADA DHISMAHA* & *DHULKA
N A *A D O* D *H U L*

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Cali Ismaaciil Maxamuud uu ku weydiistay arji Taariikhdii 18. 5. 1980 gabal dhul oo ku yaal Shalambood qaabkiisu yahay 40; 40; 40; 40 kuna fadhiya addimihiisuna waa 1.600 MDH.

Wqooyi waxaa ka xiga ; Waddada Laamiga Marka iyo Shalambood

Koonfur waxaa ka xiga : Dhismaha Cumar Maxamuud

Galbeed waxaa ka xiga ; Dhul Banaan

B A R I waxaa ka xiga : Dhul banaan

Qoofkii Daneynaya Dhulkaas waxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda Dhulka oo taal Waaxda Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud Gobolka Shabeeladda Hoose waxaanna laga doodi karaa Muddo ku siman 30 (Sodon) Maalmood oo laga Bilaabayo Maalinta la soo daabaco Buugga Faafinta Rasmiga ah :

Shalamboot, 18. 8. 1980

AGAASIMAHA *WAAXDA SAH. IYO DEG. MAGAALEYNTA*
CABD*I* MAX*AMED* CUMAR

WASAARADDA *HAWLAHA GUUD*

WAADA DHISMAHA* & *DHULKA

N A *A D O* D *H U L*

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Cumar Maxamuud Cusmaan uu u soo qortay Waaxda Sahanka iyo Degaanka Magaaleynta ee W. H. Guud Maalintii bishu ahayd 18. 5. 1980 uu ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Degmada Shalambood Qaabkiisu waa Afargeesle addimihiisuna waa 40; 40; 40; 40 kuna fadhiya 1.600

Waqooyi waxaa ka xiga : Waddada aaddo Marka iyo Shalambood

Koonfur waxaa ka xiga : Warshadda Bariiska Finjisho

Galbeed waxaa ka xiga : Dhul Banaan

B A R I waxaa ka xiga : Cali Ismaaciil Maxamuud

Qoofkii Daneynaya Dhulkaas waxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda Dhulka oo taal Waaxda Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud Gobolka Shabeeladda Hoose waxaanna laga doodi karaa Muddo ku siman 30 (Sodon) Maalmood oo laga Bilaabayo Maalinta la soo daabaco Buugga Faafinta Rasmiga ah :

Shalamboot, 18. 8. 1980

AGAASIMAHA *WAAXDA SAH. IYO DEG. MAGAALEYNTA*
CABDI MAXAMED CUMAR

L. 421

WASAARADDA *HAWLAHA GUUD*
WAADA DHISMAHA* & *DHULKA
N A *A D O* D *H U L*

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Cali Ismaaciil Maxamuud uu ku weydiistay Arji Taariikhdiisu ahayd 20. 6. 1980 gabal dhul Dawladaeed ah oo ku yaal Degmdda Marka qaabkiisu yahay ELLE Addimihiisu yihiin 16;2;11;5;5;15 kuna fadhiya 595 MDH

Waqooyi waxaa ka xiga WADDO

Koonfur waxaa ka xiga : Dhul Banaan

Galbeed waxaa ka xiga : Tog Biyo Mareen ah

BARI waxaa ka xig : Laamiga u dhaxeeyo asaga iyo Dugsiga sare ee Degmada Marka.

Qoofkii Daneynaya Dhulkaas waxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda Dhulka oo taal Waaxda Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud Gobolka Shabeeladda Hoose waxaanna laga doodi karaa Muddo ku siman 30 (Sodon) Maalmood oo laga Bilaabayo Maalinta la soo daabaco Buugga Faafinta Rasmiga ah :

Laguna soo dhejiyo Ogeysiisyada ee Dawladda Hoose Waax-Farsamadda Dhulka.

Shalambooī, 18. 8. 1980

AGAASIMAHA *WAAXDA* SAH. IYO *DEG.* MAGAALEYNTA
CABD*I* MAXA*MED* CUMAR

WASAARADDA *HAWLAHA GUUD*
WAADA DHISMAHA & DHULKA
NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Cumar Maxamuud Cusmaan uu u soo qortay Waaxda Sahanka iyo Degaanka Magaaleynta ee m. H. Guud Xamar maalintii bishu ahayd 28. 6. 1980 uu ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Afgooye Qaabkiisu waa Rettangolo addimihiisuna waa 40; 40; 12; 12 kuna fdhiya 480 MDH

Waqooyi waxaa ka xiga : Waddo Mariin ah

Koonfur waxaa ka xiga : WADDO

Galbeed waxaa ka xiga : WADDO

Bari waxaa ka xiga: Laamiga aado Marka iyo Shalaambood

Qoofkii Daneynaya Dhulkaas waxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda Dhulka oo taal Waaxda Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud Gobolka Shabeeladda Hoose waxaanna laga doodi karaa Muddo ku siman 30 (Sodon) Maalmood oo laga Bilaabayo Maalinta la soo daabaco Buugga Faafinta Rasmiga ah :

Shalamboot, 18. 8. 1980

AGAASIMAHA *WAAXDA SAH. IYO DEG. MAGAALEYNTA*
CABDI MAXAMED CUMAR

L. 423

WASAARADDA *HAWLAHA GUUD*

WAADA DHISMAHA* & *DHULKA

N A *A D O* D *H U L*

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Maxamuud Xasan Maxamuud uu ku soo weydiistay Arji Taariikhdiisu ahayd 10.7.80 Gabal Dhul Dawladeed ah oo ku yaal Degmadda Marka Qaabkiisu yahay RETTANGOLO Addimihiisu yihiin 19;19;12;12-kuna Fadhiya 228 MDH.

Waqooyi waxaa ka xiga WADDO

Koonfur waxaa ka xiga : WADDO

Galbeed waxaa ka xiga WADDO

Bari waxaa ka xiga WADDO

Qoofkii Daneynaya Dhulkaas waxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda Dhulka oo taal Waaxda Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud Gobolka Shabeeladda Hoose waxaanna laga doodi karaa Muddo ku siman 30 (Sodon) Maalmood oo laga Bilaabayo Maalinta la soo daabaco Buugga Faafinta Rasmiga ah :

Laguna soo dhejiyo Ogeysiisyada ee Dawladda Hoose Waax-Farsamadda Dhulka.

Shalamboot, 18. 8. 1980

AGAASIMAHA *WAAXDA SAH. IYO DEG. MAGAALEYNTA*
CABDI MAXAMED CUMAR

WASAARADDA *HAWLAHA GUUD*

WAADA DHISMAHA & *DHULKA*

N A *A D O* D *H U L*

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Cali Ismaaciil Maxamuud uu ku soo weydiistay Arji Taariikhdiisu ahayd 20.6.80 Gabal Dhul Dawladeed ah oo ku yaal Marka Qaabkiisu yahay RETTANGOLO Addimihiisu yihiin 24;24;16;16- kuna Fadhiya 384 MDM.

Waqooyi waxaa ka xiga WADDO

Koofur waxaa ka xiga WADDO

Galbeed waxaa ka xiga WADDO

Bari waxaa ka xiga WADDO

Qoofkii Daneynaya Dhulkaas waxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda Dhulka oo taal Waaxda Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud Gobolka Shabeelaadda Hoose waxaanna laga doodi karaa Muddo ku siman 30 (Sodon) Maalmood oo laga Bilaabayo Maalinta la soo daabaco Buugga Faafinta Rasmiga ah :

Laguna soo dhejiyo Ogeysiisyada ee Dawladda Hoose Waax-Farsamadda Dhulka.

Shalamboot, 18. 8. 1980

AGAASIMAHA *WAAXDA SAH. IYO DEG. MAGAALEYNTA*
CABDI MAXAMED CUMAR

WASAARADDA *HAWLAHA GUUD*

WAADA DHISMAHA* & *DHULKA

N A *A D O* D *H U L*

Waxaa la caddeynayuu in Juulle Maxamed Xuseen Axmed uu ku soo weydiistay Arji Taariikhdiisu ahayd 10.7.80 Gabal Dhul Dawladeed ah oo ku yaal Degmadda Marka Qaabkiisu yahay AFARGEESLE Addimihiisu yihiin 19;19;19;19- kuna Fadhiya 361 MDH.

Waqooyi waxaa ka xiga WADDO

Koofur waxaa ka xiga WADDO

Galbeed waxaa ka xiga WADDO

Bari waxaa ka xiga WADDO

Qoofkii Daneynaya Dhulkaas waxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda Dhulka oo taal Waaxda Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud Gobolka Shabeeladda Hoose waxaanna laga doodi karaa Muddo ku siman 30 (Sodon) Maalmood oo laga Bilaabayo Maalinta la soo daabaco Buugga Faafinta Rasmiga ah :

Laguna soo dhejiyo Ogeysiisyada ee Dawladda Hoose Waax-Farsamadda Dhulka.

Shalamboot, 18. 8. 1980

AGAASIMAHA *WAAXDA SAH. IYO DEG. MAGAALEYNTA*
CABD*I* MAX*AMED* CUMAR

WASAARADDA *HAWLAHA GUUD*

WAADA DHISMAHA* & *DHULKA

N A *A D O* D *H U L*

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Maxamuud Xaaji Jumcaale (Biil) uu u soo qortay Waaxda Sahanka iyo Deg. Mag. ee W. H.Guud Marka maalintii bishu ahayd 30.7.80 uu ku weydiistay Gabal Dhul Dawladeed ah oo ku yaal Degmadda AFGOOYE Qaabkiisu waa RETTANGOLO Addimihiisuna waa 50;50;200;200; kuna Fadhiya 10.000- MDH.

Waqooyi waxaa ka xiga Dhul dad leh

Koonfur waxaa ka xiga Waddada aaddo Xamar iyo Afgooye

Galbeed waxaa ka xiga Xaashi Cabdi Barre

Bari waxaa ka xiga Cabdi Iidle Shuuriye

Qoofkii Daneynaya Dhulkaas waxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda Dhulka oo taal Waaxda Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud Gobolka Shabeeladda Hoose waxaanna laga doodi karaa Muddo ku siman 30 (Sodon) Maalmood oo laga Bilaabayo Maalinta la soo daabaco Buugga Faafinta Rasmiga ah :

Shalamboot, 18. 8. 1980

AGAASIMAHA *WAAXDA SAH. IYO DEG. MAGAALEYNTA*

-*CABDI MAXAMED CUMAR*

WASAARADDA *HAWLAHA GUUD*

WAADA DHISMAHA* & *DHULKA

N A *A D O* D *H U L*

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Muuse Maxamed Yuusuf uu ku soo weydiistay Arji Taariikhdiisu ahayd 30.7.80; Gabal Dhul Dawladeed ah oo ku yaal Degmadda AFGOOYE Qaabkiisu Dhul Dawladeed ah oo ku yaal Degmada Afgooye Qaabkiisu ayyah RETTANGOLO Addimihiisu yihiin 70;70;200;200- kuna Fadhiya 14.000- MDH.

Waqooyi waxaa ka xiga Dhul dad leh

Koofur waxaa ka xiga Waddada aaddo Xamar iyo Agooye

Galbeed waxaa ka xiga Cabdi Iidle Shuuriye

Bari waxaa ka xiga Maxamed Xareed Maxamed

Qoofkii Daneynaya Dhulkaas waxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda Dhulka oo taal Waaxda Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud Gobolka Shabeeladda Hoose waxaanna laga doodi karaa Muddo ku siman 30 (Sodon) Maalmood oo laga Bilaabayo Maalinta la soo daabaco Buugga Faafinta Rasmiga ah :

Laguna soo dhejiyo Ogeysiisyada ee Dawladda Hoose Waax-Farsamadda Dhulka.

Shalamboot, 18. 8. 1980

AGAASIMAHA *WAAXDA SAH. IYO DEG. MAGAALEYNTA*
CABDI MAXAMED CUMAR

WASAARADDA *HAWLAHA GUUD*

WAADA DHISMAHA* & *DHULKA

N A *A D O* D *H U L*

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Xaashi Cabdi Barre uu u soo qortay Waaxda Sahanka iyo Degaanka Magaaleynta ee H. H. Guud maalintii bishu ahayd 30. 7. 1980 uu ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Degmada Afgooye Qaabkiisu waa Retangolar addimihiisuna waa 20; 20; 200; 200 kuna fadhiya 4.000 MDH.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi waxaa ka xiga : Dhul dad leh

Koonfur waxaa ka xiga : Waddada aaddo Xamar iyo Afgooye

Galbeed waxaa ka xiga : Dhul Banaan

B A R I waxaa ka xiga ; Maxamed Xaaji Jumcaale (Biil)

Qoofkii Daneynaya Dhulkaas waxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda Dhulka oo taal Waaxda Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud Gobolka Shabeeladda Hoose waxaanna laga doodi karaa muddo ku sima 30 (sodon) Maalmood oo laga Billaabayo Maalinta la soo daabaco Buugga Faafinta Rasmiga ah:

AGAASIMAHA *WAAXDA SAH. IYO DEG. MAGAALEYNTA*

CABDI MAXAMED CUMAR

L. 429

WASAARADDA *HAWLAHA GUUD*

WAADA DHISMAHA* & *DHULKA

N A *A D O* D *H U L*

Waxaa la cddeynayaa in Jaalle Cabdi Iidle Shuuriye uu u soo qortay Taariikhdiisu ahayd 30. 7. 1980 gabal dhul Dawladeed ah oo ku yaal Degmada Afgooye Qaabkiisu yahay Regtangolar Addimihiisu yihiin 30; 30; 200; 200 kuna fadhiya 6.000 MDH.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi waxaa ka xiga Dhul dad leh

Koonfur waxaa ka xiga : Waddada Aado Xamar iyo Afgooye

Galbeed waxaa a xiga : Maxamed Xaaji Jumcaale 5 Biil

B A R I Muuse Maxamed Yuusuf

Qoofkii Daneynaya Dhulkaas waxuu si fiican uga arki ee Wasaaradda Hawlaha Guud Gobolka Shabeeladda Hoose waxaanna laga doodi karaa muddo ku sima 30 (sodon) Maalmood oo laga Billaabayo Maalinta la soo daabaco Buugga Faafinta Rasmiga ah:

Laguna soo dhejiyo Ogeysiisyada ee Dawladda Hoose Waax-Farsamadda Dhulka.

AGAASIMAHA *WAAXDA SAH. IYO DEG. MAGAALEYNTA*

CABDI MAXAMED CUMAR

Muqdisho 25.8.1980

L. 430

WASAARADDA *HAWLAHA GUUD*

WAADA DHISMAHA* & *DHULKA

N A *A D O* D *H U L*

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Maxamed Xareed Maxamed uu ku soo weydiistay arji Taariikhdiisu ahayd 30. 7. 1980 gabal dhul Dawladeed ah oo ku yaal Degmadda Afgooye Qaabkiisu ya-yahay 52.000 Addimihiisu yihiin 260; 260;200 kuna fadhiya MDH

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi waxaa ka xiga: Dhul dad leh

Koonfur waxaa ka xiga : Wadada aada Xamar iyo Afgooye

Galbeed waxaa ka xiga : Muuse Maxamed Yuusuf

B A R I waxaa ka xiga : Dhul dad leh

Qofkii Daneynaaya Dhulkaas waxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda Dhulka oo taal Waaxda Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud Gobolka Shabeeladda Hoose wa-xaanna laga doodi karaa muddo ku sima 30 (sodon) Maalmood oo laga Billaabayo Maalinta la soo daabaco Buugga Faafinta Rasmiga ah:

Laguna soo dhejiyo Ogeysiisyada ee Dawladda Hoose Waax-Farsamadda Dhulka.

Shalambood 18. 8. 1980

AGAASIMAHA *WAAXDA SAH. IYO DEG. MAGAALEYNTA*

CABDI MAXAMED CUMAR

L. 431

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

WAADA DHISMAHA & DHULKA

NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Cabdullaahi Cali Dhuubo uu ku weydiistay Arji Taariikhdiisu ahayd 30. 1. 1980 gabal dhul Dawladeed ah oo ku yaal Degmada Marka Tuulada Shalambood qaabkiisu yahay Regtangolar Addimihiisu yihiin 50; 59; 40; 40 kuna fadhiya 2.000 MDH.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi waxaa ka xiga ; Dhul Banaan

Koonfur waxaa ka xiga Waddada Xamar/Shalambood

Galbeed waxaa ka xiga Jid u dhexeeyo asaga iyo Xaaji Muuse

Bari waxaa ka xiga Dhul Bannaan

Qofkii Daneynaaya Dhulkaas waxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda Dhulka oo taal Waaxda Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud Gobolka Shabeeladda Hoose wakaraa Naqshadda Dhulka oo taal Waaxda Dhismaha iyo Dhulka

Farsamadda Dhulka.

Laguna soo dhejiyo Ogeysiisyada ee Dawladda Hoose Waax Farsamadda Dhulka.

Shalambood 18. 8. 1980

AGAASIMAHA WAAXDA SAH. IYO DEG. MAGAALEYNTA
CABDI MAXAMED CUMAR

WASAARADDA *HAWLAHA GUUD*

WAADA DHISMAHA* & *DHULKA

N A *A D O* D *H U L*

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Sheekh Cabdi Maxamed iyo Axmed Abiikar uu ku soo weydiistay Arji Taariikhdiisu ahayd 4.5.75. Gabal Dhul Dawladeed ah oo ku yaal Degmadda Shalambood Qaabkiisu yahay RETTANGOLO Addimihiisu yihiin 60; 60;65;65; kuna Fadhiya 3900- MDH.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi waxaa ka xiga Beerta Calasow

Koofur waxaa ka xiga Jidka Golweyn iyo Shalambood

Galbeed waxaa ka xiga Dhismaha Ambo

Bari waxaa ka xiga Axmed Xaaji Warsame

Qofkii Daneynaaya Dhulkaas waxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda Dhulka oo taal Waaxda Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud Gobolka Shabeeladda Hoose waxaanna laga doodi karaa muddo ku sima 30 (sodon) Maalmood oo laga Billaabayo Maalinta la soo daabaco Buugga Faafinta Rasmiga ah:

Laguna soo dhejiyo Ogeysiisyada ee Dawladda Hoose Waax. Farsamadda Dhulka.

Shalambood 18. 8. 1980

AGAASIMAHA *WAAXDA SAH. IYO DEG. MAGAALEYNTA*

CABD*I* MAX*AMED* CUMAR

L. 433

WASAARADDA *HAWLAHA GUUD*

WAADA DHISMAHA & *DHULKA*

N A *A D O* D *H U L*

Waxaa la caldeynayaa in Jaalle Xaaji Yuusuf Sheekh Cabdi Maxamuud in uu ku soo weydiistay arji Taariikhdiisu ahayd 8. 1. 1980 gabal dhul Dawladeed ah oo ku yaal Degmada Marka Qaabkiisu yahay Regtangolar Addimihiisuna yihiin 7, 10, 7, 10 kuna fadhiya 95,85 MDH.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi waxaa ka xiga : Guri Dhisan

Koonfur waxaa ka xiga : Guri Dhisan

Galbeed waxaa ka xiga : Jid la maro

B A R I waxaa ka xiga : Jid la maro

Qofkii Daneynaaya Dhulkaas waxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda Dhulka oo taal Waaxda Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud Gobolka Shabeeladda Hoose waxaanna laga doodi karaa muddo ku sima 30 (sodon) Maalmood oo laga Billaabayo Maalinta la soo daabaco Buugga Faafinta Rasmiga ah:

Laguna soo dhejiyo Ogeysiisyada ee Dawladda Hoose Waax. Farsamadda Dhulka.

Shalambood 18. 8. 1980

AGAASIMAHA *WAAXDA SAH. IYO DEG. MAGAALEYNTA*
CABDI MAXAMED CUMAR

L. 484

MAXKAMADDA GOBOLKA Sh/Hoose Marka

MARKUU ARKAY : Dacwada uu soo qortay Jaalle Axmed Xasan iyo Jaalle Axmed Shuuki Cabdi tr. 22. 8. 1980;

MARKUU ARKAY : Ogeysiiska B. Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta Afgooye;

MARKUU ARKAY :labada Buug keydka Bangiga oo aay lambaraduudu yihiin L. 243 kuna qoran Jaalle Xasan Axmed Xasan lacag dhan Sh. So. 728 iyo lamb. 93 kuna qoran Axmed Shuuki Cabdi lacag dhan Sh. So. 44.025

MARKUU ARKAY : Qodobka 69 D. L. 9. 9. 1965 N. 2.

WUXUU AMRAYAA

In loo cusbooneysiiyo Buugga Keydka kadib markii aay ka soo wareegato mudo 30 (soddon) maalmood kadib marka lagu shaaciyo Dekreetada Faafinta Rasmiga ah ee Dowladda.

Waxaa la codsanayaa in Buuggaga cusub ee la sameyndoono gacanta laga saaro Jaalle Xasan Axmed Xasan iyo Jaalle Axmed Shuuki Cabdi ama qof isla asiga ka sita Wakaalad sharci ah ayadoo la sugaayo mudo 30 casho.

GUDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOBOLKA Sh. Hoose
Dr. Xiis Cumar Jihaad

Muqdisho 25. 8. 1980

L. 435

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GUDOOMIYAHA

MADUU AKHRIYEY : dacwadda kor ku qoran;

MADUU HUBSADAY in Buug Keyd dhumay oo lambarkiisu ahaa 243 lagana soo saaray Bangiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed Laanta Afgooye kuna qorneyd lacag dhan Sh. So. 20.728 uu iska lahaa Xasan Axmed Xasan sida ku cad warqadda lamb. ————————Taariikh 21.8.1980 oo bangiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Afgooye.

MADUU ARKAY : qod 69 Sharciga lam. 2 ee 9.9.1965

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo Buuga Keydka Lamb. 243 oo ku qoran Magaca Xasan Axmed Xasan ayna ku jirto Sh. So. 20.728.

WUXUU FASAXAY

In Bankiga Ganacsiga iyo keydka laanta Afgooye u beddelo Xasan Axmed Xasan buugga Keydka) ee kor ku tilmaaman una sameyn mid la mid ah dib markay ka soo wareegto mudo aan ka yarayn 30 maalmood maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliyeed, haddii inta ka horeysa aan is hortaag laga keenin.

Muqdisho, 27.8.1980

GUDOOMIYAHA MAXKAMADA GOBOLKA BENAADIR

Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax

L. 436

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADDUU AKHRIYEY dacwadda kor ku qoran;

HADDUU HUBSADAY in Buug Keyd dhumay oo lambarkiisu

ahaa 15029 lagana soo saaray Bangiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed Laanta 1aad kuna qorneyd lacag dhan Sh So. 30,000 uu iska lahaaa Axmed Cusmaan Axmed sida ku cad warqadda lamb. ———— Taariikh 26.8.1980 oo bangiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta 1aad.
HADUU ARKAY : qod 69 Sharciga lam. 2 ee 9.9.1965

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo Buuga Keydka lamb. 15029 oo ku qoran Magaca Axmed Cusmaan Axmed ayna ku jirto Sh. So. 30,000

WUXUU FASAXAY

In la Bankiga Ganacsiga iyo keydka laanta 1aad u beddelo Axmed Cusmaan Axmed buugga Keydka, ee kor ku tilmaaman una sameyn doono mid la mid ah ka dib markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 30 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco faafinta rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Soomaaliyeed, haddii inta ka horeysa aan is hortaag laga keenin.

Muqdisho, 26.8.1980

GUDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOBOLKA BENAADIR
Dr Cabdullaahi Maxamed Maax

MAXKAMADDA GOBOLKa **BANAADIR**

HADDUU AKHRIYEY : Dacwadda kor ku qoran;

HADUU HUBSADAY in Jeega Wareeya dhumay oo lambarkiisu ahaa 03455. Lagana soo saaray Bangiga Ganacsiya iyo keydahaa 034555 lagana soo saaray Bangiga Ganacsiga iyo keyd-Sh. So. 8.200 uu iska lahaa Abuukar Xaaji Maxamed sida ku cad warqadda lamb. ——— Taariikh oo bangiga Ganacsiga iyo Keydka Scomaaliyeed Laanta Dhexe .

WUXUU *XEERIYEY*

In la baabi'iyo Jeega Wareega Lam. 034555 oo ku qoran Magaca Abuukar Xaaji Maxamed ayna ku jirto Sh. So. 8.200

WUXUU FASAXAY

In Bankiga Ganacsiga iyo Keydka laanta Dhexe u beddelo Abuukar Xaaji Maxamed Jeeg Wareega ee kor ku tilmaaman una sameeyo mid la mid ah ka dib arkay ka soo wareegto mudo aan ka yarayn 15 maalmood maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliyeed. haddii inta ka horeysa aan is hortaag laga keenin.

Muqdisho, 7. 7. 1980

GUDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOBOLKA BENAADIR
Dr. Cabdullaahi *Maxamed* Maax

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADDUU AKHRIYER ; dacwadda kor ku qoran;

HADDUU HUBSADAY : in jeega Wareega dhumay oo lambar kiisu ahaa 38373 lagana soo saaray Bangiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta kuna qorneyd lacag dhan Sh. So. 3.800 uu iska lahaa Abuukar Xaaji Maxamedsida ku cad warqadda lamb. —D—— Taariikh ———— oo bangiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta.

HADUU ARKAY ; qod 69 Sharciga lamb. 2 ee 9. 9. 1965.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo Jeega Wareega Lamb. 38373 oo ku qoraan Magaca Abuukar Xaaji Maxamed ayna ku jirto Sh. So. 3.800

WUXUU FASAXAY

In Bankiga Ganacsiga iyo Keydka laanta Xarunta u beddelo Abuukar Xaaji Maxamed Jeega Wareega ee kor ku tilmaaman una sameeyo midl la mid ah ka dib markay ka soo wareegto mudo aan ka yarayn 15 maalmood maalinta go'aanka lagu daabaco faafinta rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliyeed, hadii inta ka horeysa aan is hortaag laga keenin.

Muqdisho, 7. 7. 1980

GUDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOBOLKA BENAADIR
Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADDU UU AKHRIYEY: dacwadda kor ku qoran;

HADDUU HUBSADAY :in Buug Keyd dhumay oo lambarkii-

su ahaa 16966. Lagana soo saaray Bankiga Banacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta kuna qorneyd lacag dhan Sh. So. 10.521 uu iska lahaa Xasan Cabdi Maxamuud sida ku cad warqadda lamb. 02047 Taarbkh ——————— oo banagiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta.

GUDDOOMIYAHA

HADDUU ARKAY : qod 69 Sharciga lamb. 2 ee9. 9. 1965.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo Buuga Keydka lamb. 16966 oo ku qoran Magaca Xasan Cabdi Maxamuud ayna ku jirto Sh. So. 10.521

WUXUU FASAXAY

In Bankiga Ganacsiga iyo Keydka laanta Xarunta u beddelo Xasan Maxamuud buugga keydka ee kor ku tilmaaman una sameyso mid la mid ah ka dib markay ka soo wareegto mudo aan ka yarayn 30 maalmood maalinta go'aanka lagu daabaco faafinta rasmiga ah ee Jamhuuriyada Demoqraadiga Soomaaliyeed, haddii inta ka horeysa aan is hortaag laga keenin.

Muqdisho 25.8.1980

GUDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOBOLKA BENAADIR
Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax

L. 440

MAXKAMADDA GOBOLKA. BANAADIR

HADDUU AKHRIYEY: Dacwadda kor ku qoran;

HADDUU HUBSADAY: In Buug Keyd dhumay oo Lam. ahaa 13.710.

Lagana soo saaray Bangiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta kuna qorneyd lacag dhan Sh.so.3.509 uu iska lahaa Faadumo Cabdalla Maxamed sida ku cad Warqadda lamb. 13710 Taariikh 14.4.80 oo bangiga ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta.

HADDUU ARKAY: Qod 69 Sharciga L. 2 ee 9.9.1965

WUXUU XEERIYEY

La baabi'iyo (ammortamento) Buug Keyd lam. 13710 oo ku qoran Magaca Faadumo Cabdalla Maxamed ayna ku jirto Sh.so. 3.509/-

WUXUU FASAXAY

In Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Laanta Xarunta u beddelo Faadumo Cabdalla Maxamed buugga keydka), ee kor ku tilmaaman una sameyn mid la mid ah ka dib markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 30. maalmood maalinta go'aanka lagu daabaco faafinta rasmiga ah ee J.D.S., haddii inta ka horeysa aan is hortaag laga keenin.

GUDOOM. MAXKAMADDA GOBOL. BENAADIR

-Dr Cabdullaahi Maxamed Maax-

L. 441

MAXKAMADDA GOBOLKA SH. HOOSE MARKA

HADDUU ARKAY: Arjiga Dacwadda

HADDUU ARKAY: Waxay ku saabsan tahay iyo Dhuuxa Arjiga

HADDUU OGAADAY: Inay jirijirtay (SOC.ELET.INDOSTR. SOMALI MERKA

HADDUU OGAADAY: Inay Shaqadiisa tahay
HADDUU ARKAY: Qod.69 ee D.L.9.9.65 N.2 Lumidda (AZIONE(SAHMI)

Lambar Azione 142 con Sh.So.1000 midkiiba uu leeyahay

WUXUU AMRAYAA :

In loo sameeyo (Azione(Sahmi) cusub weydiistaha Jaalle Khaliif Saciid Cilmi ka dib markii 15 Maalmood ka soo wareegto maalinta Decretada lagu shaaciyo Faafinta Rasmiga ah.

WUXUU AMRAYAA :

In Azione -Sahmi) cusub loo sameeyo Gacanta laga saaro Jaalle Khaliif Saciid Cilmi ama Qof Wakaalad Sharci ah ka sidata.

Iydoo la sugayo muddada 15ka maalmood oon kor ku soo shoegnay.

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOBOLKA SH HOOSE
Dr. Axmed Sheekh Cali Nuur

Marka, 27. 7.80

L. 442

*MAXKA*MADDA *GOBALKA MUDU*G

Guddoomiya Maxkamadda Gobolka ee Sare ku qoran:
HADDUU ARKAY: Dacwadda kor ku qoran.
MARKUU EEGAY: Qodobka 82 iyo 69 D/L 2 taariikhdiisu tahay 9.9.65 ee lumidda Jeegga wareega lambar 207178 ee qoray 8.5.80ka ay qoran tahay SHS. 4000.00 (AFAR KUN) ayna samaysay Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Laanta Gaalkacyo, kuna xusan dacwadda Sare ku magacaaban.

WUXUU AMRAYAA

In loo cusbooneysiiyo Jeegga kadib markii ay ka soo wareegto 30 (SODDON) maalmood maalinta Digreetada lagu sharciyo Faafinta Rasmiga ee Dawladda.

WAXAANA

Lacodsanayaa in Jeegga cusub ee la samayn doono gacanta laga saaro Cali Xirsi Cali, iyadoo la sugaayo muddo 30 maalmood ah ee aan kor ku soo sheegay.

Gaalkacyo 17. 5. 1980

GUDDOMIYAHA MAXKAMADDA GOBOLKA

DR. CUMAR COLAAD CABDI

L. 448

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADDUU: Akhriyay dacwad kor ku qoran:

HADDUU: Hubsaday in Jeeg Wareeg dhumay oo lambarkiisu ahaa 226511 Lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Kaykda Soomaaliyeed Laanta Gaalkacayo kuna qorneyd Lacag dhan Ss. So. 9.700/= uu Iska lahaa Warsame Cali Cigaal sida ku cad warqadda lam. 008078 taariikh 17/8/80 oo Bangiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta Gaalkacyo.

HADDUU: Arkay qod. 69 Sharciga lam. 2 ee 9.9.65.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeeg Wareeg lam. 226511 oo ku qoran Magaca Warsame Cali Cigaal ayna ku jirto Sh. So. 9.700/=.

WUXUU FASAXAY

In Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka laanta Gaalkacayo u beddelo Warsame Cali Cigaal buuga keydka, ee kor ku tilmaaman una sameyn mid la mid ah ka dib markay so soo wareegto mudo aan ka yareyn 15 maalmood maalinta go'aanka lagu daadaco faafint rasmig ahee Jmhuuriyaddda Demoq. Soomaaliyeed, haddii inta ka horeysa aan is hortaag laga keenin.
Muqdish, 17/8/80

GUDOOM. MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

Dr. CABDULLAAHI MAXAMED MAAX.

L. 444

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

QEYBTA MADANIGA

HADII LA ARKAY: Codsiga kor ku qoran iyo qoraaladda ku lifaaqan.

HADDI LA ARKAY: Qod. 37 iyo qod. 27 sharciga lambar 2 oo soo baxay 9. 9. 1965.

WAX*AA LA CADDEYNAYAA*

Baabi'idda (Ammortamento) shan sahmi oo ah nominativo oo ay soo saartay sharikadda Korontada Marka, kuna qoran Maagaca Abba- Nuur Abuukar Maxamed.

WAXAA AMRAYAA

Sharikadda Korontada Marka in ay u sameyso Abba-Nuur Abuukar Maxamed shan (5) sahmi Nominativo ah ayna ku qoran tahay kiiba Sh. So. 1000/— (Kun kaddib markay ka soo wareegto hal bil marka go'aanka lagu daabaco faafinta rasmiga ah, haddii aan laga keenin ishortaag.

WAXAA LA AMRAYAA

In go'aankaan lagu daabaco faafinta rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya, lana gaarsiiyo shirkadda Korontada Marka ee Gobolka Sh. Hoose.

Xamar, 21 8.80.

GUDDOMIYAHA MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

W.S. Dr. CABDULLAHI MAXAMED MAXAAD

L. 445

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

WAAXDA SAHANKA IYO DEGAANKA MAGAALEYNTA

NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Maxamed Cali Xasan uu u soo qortay Waaxda Sahanka iyo Deg. Magaaleynta ee gabal dhul dowladeed ah oo ku yaal Muqdisho Degmada Afgooye Qaabkiisu waa afar gees (Quadrato) addimihiisuna waa 24;24;24;24 kuna fadhiya 576 mdh.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi waxaa ka xiga: Waddo

Koonfur waxaa ka xiga: Waddo

Galbeed waxaa ka xiga: Dhul bannaan

B a r i waxaa ka xiga: Waddada Afgooye Wala weyn

Qofkii danaynaya dhulkaa waxuu si fiican uga arki karaa Naqshada dhulka oo yaal Waaxda Sahanka iyo Deg. Mag. ee W.H.Guud maalintii bishu ahayd 1.12.79 uu ku weydiistay maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoray Buuga Faafinta Sharciga Rasmiga ah.

Muqdisho, Marka 20. 4. 80

Agaasimaha Waaxda Sahanka iyo Deg. Mag.
Cabdi Maxamed Cumar

L. 446

WASAARADDA HAWLAHA GUUD
WAAXDA SAHANKA IYO DEGAANKA MAGAALEYNTA
NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Mayow Sheekh Cusmaan uu u soo qortay Waaxda Sahanka iyo Deg. Magaaleynta ee W.H.Guud maalintii bishu ahayd 1.12.1980 uu ku weydiistay gabal dhul dowladeed ah oo ku yaal Muqdisho Degmada Afgooye Qaabkiisu waa afar gees (Quadrato) addimihiisuna waa 24;24;24;24 kuna fadhiya 576 mdh.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi waxaa ka xiga: Waddo

Koonfur waxaa ka xiga: Waddo

Galbeed waxaa ka xiga: Dhul bannaan

B a r i waxaa ka xiga: Guri uu leeyahay Maxamed Cali Xasan.

Qofkii danaynaya dhulkaa waxuu si fiican uga arki karaa Naqshada dhulka oo yaal Waaxda Sahanka iyo Deg. Mag. ee W.H.G. Xamar waxaana laga doodi karaa muddo (30) Soddon maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoray Buuga Faafinta Sharciga Rasmiga ah.

Muqdisho, Marka 20. 4. 80

Agaasimaha Waaxda Sahanka iyo Deg. Mag.
Cabdi Maxamed Cumar

L. 447